

# Darxumeynta Ubadka/Carruurta Ku Dhex Nool Dagaal Qoys

Xaashida Macluumaadka

## Dhibaatada iyo Muujinta **dagaalka qoys six xun ayuu u saameeyaa mustaqbalka caruurta hadda iyo berriba**

Gebi dalka Canada caruur ayaa ku sugan darxumo iyo dayac. Waxa ay ku nool yihiin guryo cadho ama dagaal ka jiro ama meelo si xun maan dooriyuhu ugu badan yahay.

### Sida darxumeyn, dayac iyo muujinta dagaal u saameeyaan caruurta

- Baqdin iyo welwel ayaa caruurtu ku sugnaanyihii, aduunkana waxay u heysta in uu yahay meel khatar ah.
- Waxaa laga yaabaa inay noqdaan kuwo dagaal badan, iyagoo ku qaylinaya Xoogna ku-muquuninaya kuwa kale.
- Waxaa laga yaabaa inay baqaan, gaabsadaan iyaga oo moodsan in noloshooda aysan waxba ka badeli karin.
- Dhib ayey kala kulmi karaan waxbarashada, maxaa yeelay maskaxdoodu waxay mashquul ku tahay dhibta ay kala kulmaan ku noolaadka meel darxumo leh.
- Waxaa laga yaabaa inay ku koraankhatarta ah in ay noqdaan qaar ku xad gudba dadka kale ama iyaga lagu xad gudbo.
- Darxumeynta iyo muujinta dagaalka qoysku waxa uu wax yeeli karaa horumarka maskaxda caruurta.[1]

Taasu waxay si xun u saameysaa dhismaha, maskaxda, dareenka iyo nafta caruurta. Waxa kale oo ay dhibaateysaa sida ay caruurtu dadka kale ula xidhiidhi karaan ama saaxiibo u sameysan karaan. Haddi caruurta ku sii dhex noolaadaan dagaal qoys iyo darxumo, waxa ay wax yeeli kartaa horumarkooda iyo maskaxdooda.

## Qeybaha Darxumeynta

**DAYACA WAXAA KA MID AH:**

- Ka hagrashocunto, , dhar siin, hoy, daryeel caafimaad ama ka badbaadin dhibaato
- Ilmaha oo la tusi waayo jaceyl ama lagu abuuri waayo in uu ka tirsanyahay qoyska

**DHAAWACA DAREENKU WAXA UU NOQON KARAA:**

- La kulan dagaal qoys ama iska horimaad culus ee qoyska
- Mas'uulka ilmaha ama qof guriga ilmaha kula nool oo si xun u isticmaala mukhadaraadka ama maandooriyaasha
- Ilmaha oo isu qaata in la neceb yahay
- Canaan, cabsi gelin, hoos u dhigid, eedeyn aan habooneyn, ama waxyaalaha uu filaayo ilmuhu

**WAXYEELO JIREED** taasu waxa ay dhacdaa marka qof ilmaha si ula kac ah shakhsi xoog ku muquuniyo, dhaawacna u geysto jidhka ilmaha.

**FARO XUMEYN** taasu waxa ay dhacdaa marka ilmaha lala yeesho fal ama hawlo ku saabsan galmo.

- Fara xumeyntu waxay ka mid tahay taabasho galmo, galmo dhan, ilmaha oo looga faa'ideysto si galmo ahaan ah, ama ilmaha oo la baro dhaqan galmo
- Fara xumeynta waxaa sameyn kara waalid, xigto, saaxiib ama qof aan la aqoon. Badanaa, faraxumeynta waxa caruurta ku sameeya qof ay yaqaanaan.



# Astaamaha in ilmo ama qof yari ku dhex nool yahay goob degaan darxumo leh

Dhamaan caruurta la darxumeeyey ama la dayacay ma muujiyaan astaamaha soo socda. Caruurta astaamahaas muujiyaana gebi ahaan kuma noolaa guryo darxumo ama guryo dagaal. Hase ahaatee, haddii aad aragto astaamaha soo socda, waa in aad dareenta in ilmaho ama qof dhalin yar uu ku noolaan karo goob darxumo oo lagu dhibay ama ay la kulmeen dagaal qoys.

- Ilmo badanaa gaajaysan, wisikh ah ama aan wadan dharka ku haboon cimalada
- Ilmo yar oo mar walba keli ah
- Ilmo ama qof yar oo u muuqda inuu qaadanayo masuuliyadda dadka weyn, sida ilaalinta walaalaha ka yar-yar, ama ku howlan howlaha guriga ama "daryeelka" qof waalid ah
- Ilmo tabar daran ama aamusan
- Ilmo diidsan ka qeybgalid ama in uu u xidho darka ku haboon ciyaaraha jimicsiga
- Ilmo badanaa dagaal badan, ama cadheysan ama colaad tusa dadka kale
- Dhaawacyo ama xagtiimooyin aan la sheegi karin, gaar ahaanna ilmaha kaga dhacda meelaha aysan ciyaar caruureedku keenin ama isku dhaqaajin
- Dhaawacyo ama xagtiimooyin ka hor iman karta sababaha loo nisbeeyay
- Xagtiimooyin ama gubniin tusaya in ay ka yimaadeen qalab loo adeegsaday, sida, sigaarka, kaawiyad ama feero ama shooladda cunto kariska
- Ilmo aqoontiisa ku saabsan galmadu ay ka weyntahay da'diisa
- Ilmo muujiya dhaqan galmo marka uu la joogo dadka weyn ama carruur kale
- Ilmo tilmaama ama toos uga hadla faraxumeyn galmo
- Ilmo ama qof dhalin yar oo marar badan guriga ka baxsada
- Ilmo ama qof dhalin yar oo isticmaala khamriga ama maandooriyaasha kale

## Haddii aad dareento ilmo lagu hayo darxumeyn, dayacid ama ku dhex nool dagaal qoys - waa inaad sheegtaa

Haddii aad dareento in qof waalid ama ilaaliye ahi in uu ilmo darxumeeyey ama dayacay, waa in aad si deg deg ah u sheegtaa. Wac Booliska, Maamulka Adeegyada Caruurta iyo Qoyska ama aad wacdaa Khadka 24 saac ee Darxumeynta Caruurta: **1-800-387-KIDS (5437)**.

*Arrintaas ha la socod siin ilmaha waalidkii ama qofka ilaaliya.*

Haddii aad ka shakido qof aan aheyn waalidka ama ilaaliyahu uu darxumeynayo ilmaha, waa in aad si deg deg ah shakigaaga u gaadhsiisaa booliska Fiiri buuga telefoonada degaanka si aad u hesho telefoon nambarka booliska ee degaankaaga.

**Haddii naftaadu ama qof aad garaneysu ku sugan yahay khatar deg deg ah, wac 911** ama Khadka eeDarxumeynta Caruurta: **1-800-387-KIDS (5437).** Gurmadka bulshadaada ku saabsan ama faafaahim kale wac 24-saac ee Khadka Macluumaadka Dagaalka Qoyska ee **310-1818** ama booqo **www.familyviolence.alberta.ca.** Adeegyada Caruurta iyo Dhalinyarada ee Alberta wax uu ku kalsoon yahay in uu horseed ka noqdo dadaalka Alberta ee ku saabsan Tirtiridda Dagaalka Qoyska iyo Xoog u Sheegashada.

[1] Perry, B., (2005). Saameynta burburka ku dhaca Caruurta ku dhex nool dagaal qoys. Alberta Adeegyada Caruurta iyo Dhalinyarada*: ,Dagaalka qoys waa shaqadaada: Diiwaanka Wacyigelinta Bulshada* (Bogga 9-10). Edmonton, AB: Madbacadda Queen's. Laga soo guuriyey: http://www.child.alberta.ca/home/images/familyviolence/FVP_CommunityResourceGuide_20080528.pdf

Faahfaahin arrintan ku saabsan, tix raac Darxumeynta Ilmaha/Buuga Caruurta ku dhex nool Dagaal Qoys: lagana helo **www.familyviolence.alberta.ca** ama wac khadka bilaashka ah ee Alberta **310-1818.**



Government of Alberta